

## Xuquuqdaada xayiraada buuxda

Si loo joojiyo faafitaanka COVID-19, qaar ka mid ah dhismayaasha guryaha dadweynaha ayaa hadda ku jira xayiraad buuxda. Tani waa qorshe ku meel gaar ah oo oo degdeg ah si loo ilaaliyo caafimaadka deganayaasha iyo bulshada balaaran ee kale.

Xaaladii degdeg ah, Dawlada Victoria waxaa laga yabaa inay si ku meelgaar ah u xaddido xuquuqdaada haddii ay heyso caddeyn caafimaad oo xoog badan si ay u tusto in xanibaadu ay tahay lagama maarmaan. Inta lagu jiro xayiraada buuxda, waxaa laga yaabaa in xuquuqdaada bixitaan iyo imaansho si xor ah in la xaddido wakhti xaddidan, laakiinse dawladu waa inay sii wadaa xushmeynta xuquuqdaada kale.

Waxaad xaq u leedahay in:

- laguula dhaqmo si xushmad iyo Sharaf leh
- laguula macaamilo si la siman dadka kale ee xayiraada ku jira
- aad hesho daryeel caafimaad iyo helitaanka adeegyada naafada, oo ay ku jiraan daryeelida hooyada dhashay iyo dhalmada ka hor, daryeelka caafimaadka dhimirka, helitaanka daawada iyo adeegyada aalkolada, helitaanka daawooyinka iyo daaweynta haddii laga helo COVID-19
- aad go'aansatid daaweynta caafimaad ee aad helayso
- aad go'aansato ciddaad la wadaageysid macluumaadkaaga caafimaad
- aad heshid alaabta lagama maarmaanka u ah caafimaadkaaga shakhsiyeed, nadaafada iyo nadiifinta (oo ay ku jiraan qalabka qofka shakhsi ahaan ilaalinaya)
- aad gesho adeegyada muhiimka ah sida korontada, biyaha iyo kuleylka
- aad heshid cuntada nafaqada leh, kugu filan, ammaan ah dhaqan ahaana ku haboon
- aad hesho fursado ku filan jimicsiga jireed iyo nashaadka hawada furan sida ugu dhakhsaha badan ee xaaladaha xayiraada
- aad la xiriirto dadka degaankaaga dibadiisa jooga
- aad hesho macluumaad qoraal ah oo ku saabsan xayiraada, xuquuqdaada, iyo sidii aad ugu sameyn lahayd cabasho luuqadaada iyo qaab aad fahamsan tahay
- aad caawimaad ka hesho dhibaatooyinka sharciyeed
- aad la hadashid wakiiladaada qunsulka ama ergayga haddii aad tahay muwaadin dal dibeda ah u dhashay
- aad xor ka ahaatid dhaleeceynta diimeed iyo jinsiyadeedba.

Haddii xayiraadu ku saameysay, waxaan ku siin karnaa macluumaad ku saabsan xuquuqdaada, kuu sheegi karnaa sidii aad cabasho u sameyn lahayd, waxaana kuu diri karnaa adeegyo kale ama kaa caawin karnaa sidii aad uga warbixin lahayd waxaad saluugsan tahay:

- Wac 1300 152 494
- limeyl [enquiries@veohrc.vic.gov.au](mailto:enquiries@veohrc.vic.gov.au)

Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo website keena [www.humanrights.vic.gov.au](http://www.humanrights.vic.gov.au)

Tallo sharci waxaa sidoo kale laga heli karaa adoo soo wacaya 1800 113 432